Faallo Kooban 01

Maarso 2019

Soo koobid

Shacabka Soomaaliyeed waxaa u badan dhalinyaro. Hay'adaha dowladda oo ay awooddoodu yar tahay, amni xumo, kaabayaashii oo burbursan, iyo fursado badan oo shaqo oo aanan jirin ayaa ka dhigay dhalinyaro badan kuwo shaqo la'aan ah ama ku shaqeeya xaalado adag. Fursadaha shaqo waa ay yar yihiin, xulashada shaqaalahana tartan furan kuma saleysna. Warbixintan waxa ay falanqeyneysaa sababaha keena dhibaatooyinka shaqo ee heysta dhalinyarada, waxyaabaha ka dhasha. Waxa ay warbixintu kusoo gunaanadeysaa talooyin tixgelin mudan.

Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.com

© 2019 Somali Public Agenda

Dhibaatooyinka shaqada ee heysta dhalinyarada Soomaaliyeed

MAHAD WAASUGE IYO MAXAMED CIRBAD

Hordhac

Tirada dadka ku nool Afrikada ka hooseysa Saxaraha aad ayuu u kordhayaa marka la barbar dhigo gobollada kale, tirada ugu badan ee dadka da'da shaqada ku jirana waa dhalinyaro (McArthur, 2014). Qiyaastii kala bar dadka ku nool Afrikada ka hooseysa Saxaraha waxa ay da'doodu ka yar tahay 25 sano (Filmer & Fox, 2014). Inkastoo wax-soo-saarka gudaha uu si tartiib ah u korayo, hadana dhalinyaro badan ee ku nool Afrika kuma qanacsana horumarka dhaqaale sababtoo ah kobaca dalal badan waxa uu ka yimaadaa shidaalka, saliidda iyo macdanta kuwaasoo aanan u baahneyn in dhalinyaro badan ka shaqeyso, taasoo ka dhigeyso dhalinyaro badan kuwo shaqo la'aan ah (Filmer & Fox, 2014).

Soomaaliya waxa ay kamid tahay dalalka Afrika oo ay dhalinyaradu u badan yihiin. Sida ay muujisay sahan ay sameeyeen Wasaaradda Qorsheynta iyo Sanduuqa Qaramada Midoobay ee Tirakoobka (2014), 75 boqolkiiba dadka Soomaaliyeed waxa ay da'doodu ka yar tahay 30 sano. In ka badan kala bar dadka (qiyaastii 6.3 malyan ama 52.4 boqolkiiba) ayaa ku jira da'da shaqada (oo ah da'da u dhexeysa 15-64 sano oo ah da'da dadka shaqeyn kara ama doonaya in ay shaqeeyaan). Dadka ugu badan (43.7 boqolkiiba) waxa ay ku nool yihiin magaalooyinka (United Nations Population Fund, 2016).

Si lamid ah inta badan dalalka Afrika ee Saxaraha ka hooseeya, fursado shaqo oo aanan jirin ayaa ah mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ka jira Soomaaliya. Inta badan dadka ay saameyso shaqo la'aanta waa dhalinyaro. Si loo fahmo hannaanka shaqo helista iyo caqabadaha ay wajahaan dhalinyarada, waxa aan la hadalnay 18 dhalinyaro Soomaaliyeed oo isugu jiray weriyayaal, dhaqaatiir, arday jaamacadeed, cilmibaarayaal, qareenno, iyo dhalinyaro shaqo la'aan ah oo dhammaantood ku sugnaa Muqdisho bilihii Janaayo iyo Febraayo ee sanadkan 2019.

Caqabadaha dhaqo

Waxaa jiro waxyaabo badan oo qeyb ka qaatay shaqo la'aanta baahsan ee ka jirta Soomaaliya. Maqnaanshaha dowlad si buuxda uga shaqeysa dalka ayaa la dhihi kara waa sababta ugu weyn. Soddonkii sano ee ugu dambeysay hay'adaha dowladda waxa ay ahaayeen kuwo tabar yar ama aanan shaqeynin. Awoodda dowladda u leedahay in ay diyaariso kaabayaashii sahli lahaa maalgelin iyo shaqo abuur waxaa dhaawacay burburkii dowladdii dhexe iyo dagaalladii sokeeye ee dalka soo maray. Sidoo kale, amni xumida ka jirta qeybo kamid ah Soomaaliya waa xaalad kale oo qeyb ka qaadatay shaqo la'aanta iyo in aanan si buuxda loo

shaqeynin (in saacado yar la shaqeeyo, lacag yarna la qaato, ama in uu qofku qabto shaqo aanan ka turjumeynin awoodda iyo aqoonta uu leeyahay), gaar ahaan dhalinyarada.

Kheyraadka dalka sida beeraha, kalluunka, iyo xoolaha nool wax-soo-saarkooda wuu hooseeyaa (waa wax-soo-saar u baahan xirfado kooban). Inta badan badeecada la isticmaalo, oo qaar badan oo kamid ah lagusoo saari karay gudaha dalka, dibadda ayaa laga keenaa. Tani waxa ay yareysay fursadaha shaqo. Sidoo kale, iskaashi dowladda iyo ganacsatada ah oo awood u siin karay dowladdu in ay fursado shaqo abuurto waxa uu ku jiraa marxalad bilow ah.

Iyadoo ay fursadaha shaqo ay yar yihiin, ayaa haddana waxaa jiro xaalado kale oo sii xumeeyay dhibaatooyinka shaqo ee heysta dhalinyarada. Arrimahan waxaa kamid ah in waxbarashada aanay ka turjumeynin xirfadaha shaqo ee looga baahan yahay suuqa, hannaanka shaqo siinta oo khaldan, iyo fursadihii shaqo oo kusoo uruurtay meelo gaar ah.

Tirada jaamacadaha ku yaalla dalka waa ay kordheen gaar ahaan tobankii sano ee ugu dambeysay. Muqdisho kaliya waxaa ku yaalla in ka badan 60 jaamacadood. Laakiin xarumahan tacliintan sare sooma saaraan arday aqoon iyo xirfado kala duwan leh. Culuumta ardayda lagu baro jaamacadaha kama turjumayaan xirfadaha looga baahan yahay suuqa shaqada. Tusaale ahaan, dhalinyarada jaamacadaha dhameeyay intooda badan waxa ay ku liitaan luqadaha shaqada sidoo kale ma lahan xirfado u sahlaya in ay shaqo helaan ama abuurtaan. Waxbarashada oo aanay inteeda badan dowladdda gacanta ku heynin, sharciyada waxbarashada oo aanan la dhaqan gelin amaba jirin, amni xumida iyo barakaca joogtada ah ee ardayda ayaa qeyb ka qaatay tayada waxbarashada oo liidata.

Tiro badan oo kamid ah dhalinyarada Soomaaliyed oo aanan shaqeynin ma helin fursad ay ku aadaan iskuullo nidaami ah ama xarumaha tababarrada xirfadaha. Dhalinyaro badan ma lahan xirfadaha sida tuubiistanimada, korontada iyo dhismaha oo u sahli karay in ay ku shaqeystaan sababtoo ah barashada xirfadahan waxa ay u baahan tahay tababar. Sidaas darteed, ajaanib oo intooda badan ka yimid dalalka deriska ayaa shaqooyinkan ka qabta Soomaaliya.

Daahfurnaan la'aanta shaqo qorista ayaa ah arrin kale oo qeyb ka qaadatay dhibaatooyinka shaqo ee heysta dhalinyarada Soomaaliyeed. Si dhalinyarada jaamacadaha dhameeyay shaqo uga helaan dowladda, waa in ay weydiistaan dad ka dhashay beeshooda in ay ku caawiyaan shaqada. Siyaasiyiinta waxa ay metelaan qabiillo. Marka uu qof u baahdo in uu shaqo ka helo hay'adaha dowladda, qabiilka qofka waa kan ugu muhiimsan oo saameynta ku leh helitaanka shaqada.

Xubnaha baarlamaanka iyo wasiirrada ayaa la weydiistaa in dhalinyarada qaraabadooda shaqo uga raadiyaan xafiisyada dowladda. Arrinkan ayaa ah xaalad ka dhalatay hay'adaha shaqaalaha rayid oo aanan si wanaagsan u shaqeeynin islamarkaana si daahfuran u qaadanin shaqaalaha dowladda.

Xarumaha ganacsiga iyo hay'adaha aan macaashdoonka ahayn iyagana shaqo qoristooda ma daahfurna. Shaqooyin badan oo lasoo xayeysiiyo waxa jirta in dadkii ku guuleysan lahaa horey loosii qaatay. Sidaas darteed, dhalinyaro badan waxa ay ka niyad jabeen in ay codsadaan shaqooyinka lasoo xayeysiiyo.

Inta badan fursadaha shaqo waxa ay kusoo uruureen Muqdisho sababtoo ah waxa ay magaaladu fadhi u tahay dowladda federaalka iyo inta badan hay'adaha caalamiga ah ee ka howlgala Soomaaliya. Intaa waxaa dheer, adeegyada bulshada sida waxbarashada iyo caafimaadka waxa loosoo aadaa Muqdisho. Tani waxa ay soo dedejisay in gobollada lagasoo safro oo Muqdisho lasoo wada aado. Dhalinyaro badan oo Muqdisho u yimid in ay wax ku bartaan ayaan dooneynin in ay ka shaqeeyaan gobollada.

Ugu dambeyntii, iyadoo ay dhalinyaro badan la yimaadaan hal-abuurro ganacsi, haddana ma helaan lacago ay ka qaataan bangiyo ganacsi, deymo ama kabitaan dowladeed si ay u maalgashadaan hal-abuurradooda.

Cawaaqibta ka dhalata dhibaatooyinka shaqada

Shaqo la'aanta Soomaaliya waxaa ka dhashay dhibaatooyin badan oo ay wajaheen dhalinyarada. Kow, shaqo la'aanta baahsan waxa ay ka dhigtay dhalinyaro badan kuwo niyad jabsan oo ay kalsoonidooda liidato, waxana ay noqdeen kuwo u nugul in ay ku biiraan burcad iyo kooxaha hubeysan.

Labo, dhalinyaro badan oo shaqo la'aan ah, oo ay ku jiraan kuwo jaamacado dhameeyay, ayaa qaatay go'aanka adag ee ah in ay tahriibaan oo ay Soomaaliya ka tagaan, iyagoo naftooda khatar gelinaya si ay fursad uga helaan dalal kale.

Saddex, dhalinyarada qaar waxa ay barteen isticmaalka maandooriyeyaal kala duwan. Isticmaalka maandooriyayaasha waxa ay u arkaan qaab ay isaga yareyn karaan dhibaatooyinka nolosha. Isticmaalka Khaad-ka waxa uu qeyb ka yahay shaqo la'aanta iyo kobaca dhaqaalaha oo aad u yar. Isticmaalka tubaakada Hindiya ee loo yaqaanno 'tabuu' ayaa sidoo kale kusoo badaneysa dhalinyarada Muqdisho.

Afar, inkastoo tirada dumarka dhameynaya jaamacadaha iyo dugsiyada sare ay kordhayeen sanadihii dambe, shaqo la'aanta dhalinyarada waxa ka dhashay in dumarka qaar ee waxbartay go'aansadaan in ay galaan guur degdeg ah. Dumarka jaamacadaha

dhameeyay haddii ay sii joogaan guriga iyagoo aanan shaqo heynin, waxaa ku badanaya cadaadiska uga imaanaya waalidka iyo qaraabada oo ah in ay guursadaan intii ay guriga iska fadhin lahaayeen.

Ugu dambeyn, waxbarashada waxaa loo arkaa in ay tahay dhabbe lagu gaaro 'nolol wanaagsan'. Balse heerka shaqo la'aan oo aad u sarreeya waxa ay ka niyad jebisay dhalinyaro badan in ay waxbarashada sii wataan maadaama ay arkaan kuwo jaamacadaha dhameeyay oo aan shaqo heysanin. Dhalinyarada qaar ayaa ka niyad jabaya aadista goobaha waxbarashada maadaama ay maalin kasta arkaan walaalahood, iyo saaxiibbadood oo shaqo la'aan ah muddo sanado ah. Sidaas darteed, waxa ay aaminayaan fikradda ah in waxbarashada aanay u horseedi doonin in ay helaan shaqo wanaagsan iyo nolol fiican. Hab fikirkan waxa ay u badan tahay in uu saameyn taban ku yeesho dalka mustaqbalka fog maadaama aqoonta iyo xirfadda Soomaalida ay sii ahaan doonto mid aanan la hormarinin.

Talooyin tixgelin mudan

Xal-u-helidda dhibaatada shaqo la'aanta waa arrin u baahan dadaal wadareed iyo iskaashiga heerarka kala duwan ee dowladda, ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo bulshada guud ahaan. Shaqo la'aanta dhalinyarada waxa ay ahaan doontaa mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn oo ay Soomaaliya wajahi doonto tobannaanka sano ee soo socdo haddii aanan lasiin mudnaan. Xal degdeg ah looma helaayo shaqo la'aanta. Waxaa loo baahan yahay qorshe wakhtiga fog ah si loo yareeyo shaqo la'aanta.

Shaqo la'aanta waxa ay ka dhalataa nidaamka dowladnimo oo aanan si wanaagsan u shaqeynin, burbur dowladeed, amni darro, iyo musuqmaasuq. Hagaajinta maamulka, xoojinta awoodda hay'adaha dowladda, iyo abuurista jawi ku habboon shaqo abuur ayaa dawo u noqon kara shaqo la'aanta baahsan ee ka jirta Soomaaliya. Laakiin howlahan waa ay adag yihiin waxana ay qaadanayaan wakhti badan, guulo degdeg ahna lagama gaarayo wakhtiga dhaw. Sikastaba ha noqotee, waxaa jiro waxyaabo ay tahay in mudnaan lasiiyo.

1. Waxbarasho: hagaajinta tayada waxbarashada waa dadaal ay tahay in ay u istaagaan dhammaan bahda waxbarashada. Hase ahaatee, waa in ay ka bilaabataa mideynta manhajka waxbarasho ee dugsiyada hoose, dhexe iyo sare iyo kormeerka iyo qiimeynta dowladda ee hay'adaha tacliinta sare. Sare-u-qaadista tayada waxbarashada nidaamiga ah waxa ka dhalanaya soo saarista dhalinyaro aqoon iyo xirfad leh. Sidoo kale, kala duwanaanshaha culuumta lagu barto jaamacadaha ayaa loo baahan yahay. Xoolaha nool, dalaga beeraha, dhirta, iyo kalluunka waxa ay 75% ka yihiin wax-soo-saarka dalka (World Bank, 2018). Jaamacadaha waa in ay sameeyaan kulliyadaha iyo takhasusyada ay Soomaaliya u baahan tahay sida beeraha, xanaanada xoolaha, iyo culuumta badda.

Sidoo kale, Soomaaliya waxa ay u baahan tahay dugsiyo badan oo lagu barto xirfado kuwaasoo wakhti kooban kusoo saari kara shaqaale xirfad leh. In xoogga la saaro dugsiyada tababarka xirfadaha waxa ay kaalin muhiim ah ka qaadan kartaa sare-u-qaadista fursadaha shaqo ee dhalinyarada. Xirfadaha waxa ay muhiim u yihiin kamid ahaanshaha bulshada maadaama dadka aanan xirfadda lahayn ay shaqooyinka hoose qabtaan, niyad jabaan, awood badanna u lahayn in ay noloshooda hormariyaan. Inkastoo uu jiro faham guud ee muhiimadda ay leeyihiin xirfadaha, haddana waxa aanan caddeyn nooca xirfad ee loo baahan yahay iyo sida xirfadahaas dadka lagu bari karo. Sidaas darteed, waxaa lagama maarmaan ah in ay dowladdu xeerar u dejiso xarumaha lagu barto xirfadaha sidoo kalena diyaariso manhaj ay isticmaalaan xarumaha tababarka xirfadaha bixiya.

2. Macluumaadka shaqada: xogta la xiriirta shaqada iyo shaqaalaha Soomaaliya waa ay yar tahay. Dowladda waa in ay awood u yeelataa in ay sameyso xog uruurin la xiriirta suuqa shaqada. In la fahmo gaabiska xirfad ee ka jira suuqa iyo heerka shaqo la'aanta waxa ay sahli kartaa in la qaato go'aanno sax ah ee la xiriira shaqo abuurka dhalinyarada. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la sameeyo dhowr sharci oo lagama maarmaan u ah shaqada iyo maalgashiga. Sharciyadan waxaa kamid ah sharciga maalgashiga, siyaasadda qaran ee dhalinyarada, siyaasadda shaqada, iyo sharciga shaqaaaha.

3. Daah-furnaanta shaqo qorista: hannaanka shaqo qorista fursadaha shaqo ee jira oo ay ka faa'ideysan karaan dhalinyarada waa in ay noqdaan kuwo daah-furan kana fog eex iyo nin jecleysi. Dhalinyarada aqoonta leh oo xaalad adag wax ku baratay waxa ay mudan yihiin in ay helaan nidaam shaqo qoris oo daah-furan. Dowladda waa in ay iska bilowdaa oo ay wax-ka-beddel ku sameysaa qaabka ay shaqaalaha ku qaadato oo aanan daah-furneyn. Waa in ay sidoo kale sameysaa istaraatiijiyad ay ku dhiirrigelineyso ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo ururrada aan dowliga ahayn in ay si daah-furan ku qaataan shaqalahooda.

4. Kordhinta wax-soo-saarka dalka: xoolaha nool iyo dalagyada beeraha ayaa ah kuwa ugu badan ee wax-soo-saarka gudaha dalka, iskaashi dowladda iyo ganacsatada ayaana lagu kordhin karaa wax-soo-saarkooda. Balse dhibaatooyinka kadhasha bay'ada sida abaaraha iyo fatahaadaha ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn oo ay wajahaan. Dhinaca kale, inta badan gobollada Soomaaliya waxa ay leeyihiin xeebo. Labo Webi ayaa sidoo kale dhex marta gobollo badan. Fursado shaqo ayaa laga abuuri karaa haddii la

Si loo hagaajiyo maamulka dowliga loona hormariyo adeegyada bulshada Soomaaliya, Somali Public Agenda waxa ay sameysaa cilmibaaris ku saleysan xog-uruurin iyo aragtida shacabka. Waxa aan qorsheyneynaa in aan qeyb ka qaadanno naqshadeynta barnaamijyada iyo mashaariicda la xiriira gaarsiinta adeegyada bulshada. Waxa aan sidoo kale qorsheyneynaa in aan bixinno tababarro la xiriira maamulka iyo gaarsiinta adeegyada bulshada.

SOMALI PUBLIC AGENDA
Muqdisho - Soomaaliya
Email:
info@somalipublicagenda.com
Website:
www.somalipublicagenda.com
Facebook.com/somalipubagenda
Twitter: @somalipubagenda
Linkedin: @somalipubagenda
Instagram: @somaipubagenda

Turjumidda Af-Soomaaliga waxaa sameeyay

TAYO
TRANSLATION SERVICES

maalgeliyo kalluumeysiga. Dhibaatada isbeddelka cimillada way ku yar tahay badaha, Soomaaliyana waxa ay leedahay xeebta ugu dheer Afrika. Wacyigelin bulsho ee la xiriirta faa'idada kalluunka ayaa loo baahan yahay in la sameeyo si loo dhiirrigeliyo in dad badan ay kalluumeystaan lana cuno kalluunka. Waxaa sidoo kale muhiim ah in si nidaamsan loo siiyo doomaha kalluumeysiga shatiga lagana difaaco kalluumeysatada Soomaaliyeed dhibaatada ay kala kulmaan shirkadaha kalluumeysi ee waaweyn.

Soomaaliya waxa ay kamid tahay dalalka ay adag tahay in ganacsi laga bilaabo. Dowladda waa in ay yareysaa lacagta iyo wakhtiga diiwaangelinta ganacsiyada cusub. Tani waxa ay dhiirrigelineysaa hal-abuurka iyo sameynta ganacsiyo yaryar.

5. Sanduuqa taageerada dhalinyarada: dowladda federaalka, ganacsatada iyo deeq bixiyayaasha caalamka waa in ay sameeyaan sanduuq loogu talo galay dhalinyarada. Waa in aanay lacagtaasi noqonin mid lagu hirgeliyo barnaamij, laakiin ay noqotaa lacag lagu maalgeliyo fikradaha dhalinyarada. Dhalinyarada la yimaado fikrado ayaa codsanaya in sanduuqa u maalgeliyo fikradahooda. Sanduuqan waxaa lagu maalgelinayaa hal-abuurrada ganacsi ee dhalinyarada gaar ahaan kuwa aanan lacag aad u badan u baahneyn iyo sidoo kale isku xerka dhalinyarada. Waa in sanduuqan ay maamulaan guddi madax bannaan oo ay dadku ku kalsoon yihiin, islamarkaana leh khibrad la xiriirta maareynta maaliyadda.

6. Tiknoolojiyadda iyo hal-abuurka: dunida maanta tiknoolojiyadda waxa ay saameyn weyn ku leedahay sida dadku u shaqeeyaan, shaqooyinka iyo dabeecadaha bini'aadamka. Tiknoolokiyadda iyo hal-abuurka waxa ay fursado shaqo u abuuri karaan dhalinyarada Soomaaliyeed. Xarumo hal-abuur oo badan ayaa loo baahan yahay kuwaasoo si dhab ah u shaqeeya islamarkaana dhalinyarada Soomaaliyeed siiya fursad ay ku bisleeyaan hal-abuurkooda. Sidoo kale, website-yo loogu talo galay xayeysiinta fursadaha shaqo ee dhalinyarada ayaa la sameyn karaa.

7. Shabakado iyo ururo: dhalinyarada waa in ay bilaabaan isku-xernaan dhexdooda ah. Waxaa jira dhalinyaro si iskood ah u shaqeysta. Sameynta iskaashiga dhalinyarada sida madaxa bannaan u shaqeysata iyo ururka hal-abuurayaasha (oo caawinaad ka heli kara sanduuqa taageerada dhalinyarada ee aan kor kusoo xusnay) ayaa xoojin kara isku-xerka xirfadleysa dhalinyarada. Dhalinyarada gaar ahaan kuwa jaamacadaha dhameeyay wakhti dhaw waa in ay raadiyaan layliyo shaqo (internships) maadaama ay u sahleyso in ay ku xermaan shabakadaha xirfadkeyda dhalinyarada. Waxa ay sidoo kale siineysaa khibrad shaqo oo aad muhiim ugu ah.

Tixraac

Filmer, D. & Fox, L., 2014, Youth Employment in Sub-Saharan Africa, *World Bank*.

McArthur, J. W., 2014, Pushing the Employment Frontiers for Africa's Rural and Urban Youth, *Brookings Institution*.

UNFPA/MoPIED, 2014, Population Estimation Survey 2014. *Ministry of Planning, Investment, and Economic Development*.

United Nations Population Fund, 2016, Economic Characteristics of the Somali People. *United Nations Population Fund Somalia,* Volume 4, p. 8.

World Bank, 2018, Rebuilding Resilient and Sustainable Agriculture in Somalia, *Somalia Country Economic Memorandum*, p. 5-7.